

Henoch-Schönlein Purpura (Somali)

## Henoch-Schönlein Purpura (HSP)



Henoch-Schönlein Purpura (HSP) waa xaalad xididdada dhiigga yaryar ee jirka (gaar ahaan maqaarka, mindhicirrada, iyo kelyaha) ay ku xanuunaan oo bararaan oo ay keenaan finan. HSP waxay ku badan tahay carruurta da'doodu u dhaxayso 2 ilaa 8 sano. HSP waxaa laga yaabaa inuu ka bilawdo fayras sida qaboobaha ama hargabka. Looma gudbin karo dadka kale.

### Calaamadaha lagu garto



Finan kor u kacay oo leh baro guduud xoogaana purple ah oo kasoo baxa xagga dambe, lugaha iyo xusullada



Xanuun caloosha ah



Gacmaha iyo cagaha oo barara



Dhiig la socda saxarada iyo kaadida ilmahaaga



Xanuun laga dareemo kala goysyada (badanaa jilbaha ama anqawiyada)

### Sidee lagu ogaadaa?

Ma jiro wax tijaabo ama baaritaan ah oo lagu sameyn karo HSP. Dhakhtarkaagu wuxuu caadi ahaan ku ogaan karaa HSP haddii uu arko finanka kasoo baxay maqaarka ilmahaaga kabacdina suaalo ka weydiiya inay jiraan calaamado kale.

Dhakhtarkaagu wuxuu baari doonaa cadaadiska dhiigga ilmahaaga oo wuxuu ka qaadi doonaa kaadi (kaadi) si uu u baaro borotiinka iyo dhiigga ku jira kaadida. Waxa kale oo laga yaabaa inay sameeyaan baadhis dhiig si loo eego kelyaha.

### Daawaynta

Xanuun fudud	Xanuun dhexdhexaad ah	Xanuun daran
Daawo xanuunka sii ilmahaaga Hubi in ilmahaagu nasiino helo Lugaha ilmahaaga kor hau qaadnaadaan	Waxa dhici karta in ilmahaagu u baahdo daawaynta isteeroiyroid ka (GP gaaga kala hadal daawadan)	Ilmahaagu waxa laga yaabaa inuu u baahdo baadhitaano dheeraad ah oo uu aado cisbitaal

Carruurta badankoodu waxay ka soo kabsan doonaan HSP 4 toddobaad gudahood, xanuunka kala goysyadu waa inuu tagaa 3-da maalmood ee ugu horreeya ka dib. Waa wax caadi ah in carruurta qaarkood ay hadana astaamuhu ku soo laabtaan bilaha ugu horreeya gudahood. Si kastaba ha ahaatee, calaamaduhu ma noqon doonaan kuwo aad u daran.



## Daryeelka guriga

- Hubi in ilmahaagu cabbo cabitaan ku filan oo ay ku jiraan biyo.
- Sii paracetamol (Panadol ama Dymadon) iyo ibuprofen (Nurofen) si ay kaga caawiso xanuunka. Raac tilmaamaha ku yaal dhalada ama xirmada ay daawada ku jirto si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin ilmahaaga wax ka badan inta lagu taliyay in la siiyo maalintii.

Wixii talo caafimaad ah oo aan degdeg ahayn, wac 13 HEALTH (13 43 25 84) si aad ula hadasho kalkaaliso diiwaangashan 24 saacadood maalintii, todobada maalmood ee wiiggii qiimaha wicitaankana wuxuu la mid yahay adoo xaafada aad degan tahay wacaayo oo kale. Weydiiso turjubaan haddii aad u baahan tahay.

## Ballamaha daba-galka ah

Cunugaagu waxa uu u baahan doonaa baadhitaano joogto ah oo uu la sameeyo GP 6 ilaa 12 bilood ka dib marka la ogaado, oo ay ku jiraan baadhitaanada kaadida (wee) iyo hubinta cadaadiska dhiiga. Taas waxaa loo sameynayaa si loo hubiyo in ilmahaagu aysan ku dhicin dhibaatooyinka kelyaha. Fadlan ballan ka qabso GP-gaaga si aad u bilowdo baaritaanadan sida ugu dhakhsaha badan - isticmaal jadwalka ballanta ee hoose.

Haddii ilmahaagu qabo dhibaatooyin kelyaha ah 3 bilood ka dib, GP-gaagu wuxuu u gudbin doonaa takhasusle (specialist).

Jadwalka ballanta			
Goorma	✓	Goorma	✓
Todobaadka 1-aad		Todobaadka 10-aad	
Todobaadka 2-aad		Todobaadka 12-aad (ilmahaaga waxa loo gudbin doonaa takhtar takhasus leh haddii la ogaado dhibaatooyinka kelyaha)	
Todobaadka 3-aad			
Todobaadka 4-aad		6 bilood	
Todobaadka 6-aad		9 bilood	
Todobaadka 8-aad		12 bilood (ka dibna sannadle)	

## Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

U tag GP-gaaga haddii u ilmahaagu leeyahay:



xanuunka kala goysyada ama barar



calool xanuun



dhiig ku jira saxaradooda ama kaadidooda.

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha.

**Resource ID:** FS135 **Reviewed:** July 2022 **Cudur-daar:** Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka si loogu isticmaalo tilmaame ahaan kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, ee aan lagu beddelin, wadhadalka lala yeelanaayo dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.